

Talooyin loogu talagalay La macaamilka Dhibbanayaasha Fal dembiyeedka ee Warbaahinta

Waxaa dhici karta in weriyayaasha warbaahinta kula soo xiriiraan ka dib dembiga nacaybka ama dhacdada dembiga iyaga oo doonaya in ay helaan hadalkaaga loogu talagalay warbixintooda. Waxaa dhici kartaa in aad xataa rabi karto in aad si shaksi ahaaneed macluumaadka u soo geliso internet-ka ama warbaahintaada bulshada kuu gaarka ah. Awooda sheekadaada gaar ahaaneed waxay gacan ka geysan kartaa in ay kordhiso wacyigelinta, fahamka, waxbarashada, iyo nidaamyada ama isbeddelada sharci-dejineed. Waxaa sidoo kale dhici karta in aad lumiso asturnaanta ama u furto naftaada ama dad kale in ay wax kuu soo gaaraan siyaabo aadan ku talgalin.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka ku lug yeelashada warbaahinta:

- Waxa aad u sheegto warbaahintu waa kuwo dadka u furan oo joogto ah.
- Tixgeli in aad hore ula sii hadasho qareen wixii la xiriira tilmaamaha dhanka sharciga ah.
- Tixgeli in aad la hadasho qof wax u dooda oo ka socda [Khadka Ka Jawaabida Eexda](#) ee gobolka Oregon si uu wakhti hore si badbaado leh ugu sii qorsheeyo wax ku saabsan u hadalka si guud.
- Waxaad magacaabi kartaa qof wax u hadla si uu kuugu hadlo isaga oo kaa wakiil ah haddii aadan rabin in aad si toos ah ula xiriirto warbaahinta. Tani waxaa ka mid noqon kara xubin ka tirsan qoyska, saaxiib, qareen, hoggaamiye diineed, ama qof u dooda qofka dhibbanaha ah.
- Hubi cidda aad la hadlayso. Weydii haddii aad wici karto xarunta raadiyaha si aad u xaqiijiso xiriirkooda. Weydii in aad aragto aqoonsiga weriyaha.
- Weriyaha hore u sii weydii waxa ay tahay ujeedada uu ka leeyahay sheekadiisu oo aad oggolaato in aad la kulanto isaga.
- Soo wado saaxiib lagu kalsoon yahay si uu u noqdo markhaati ahaan iyo/ama qaado qoraalo inta lagu jiro wada hadalkaaga/hadalkaaga.
- Weydiiso oggolaansho aad adigu laftaadu ku duubto wada hadalka. Weriyuhu wuxuu ku weydiin doonaa isla sidaasi oo kale.

- Weydii haddii ay suurtagal tahay in magacu sii ahaado mid qarsoodi ah.
- Haddii aad doorato in aad wadaagto magacaaga, u higaadi weriyaha, oo si gaar ah u sheeg magac-u-yaaladaada.
- Deji xuduudo. Waxaad sheegi kartaa waxyaabo gaar ah oo ah hadalkaaga oo aan ka baxsan diiwaanka.
- Ka fiirso cawaaqib xumada ka dhalan karta. Miyuu hadalka warbaahintu soo bixi doonaa ka hor inta aadan diyaar u ahayn in uu soo baxo? Mise carruurtaada, dugsiigaaga, ama cidda aad u shaqeyso ayuu saameyn doonaa hadalkaagu?
- Hore u sii qoro qoddobada hadalkaaga ee ugu muhiimsan.
- Xusuusnow in hadalkaagu keeni karo sheeko tv, wargeys, sheeko, sheeko raadiye, sheeko dhanka internet-ka oo leh maqal/muuqaal/qoraal, iyo waxyaabo badan.
- La soco in blogger-ka, saameynta leh, podcaster-ka, ama qof kale oo aan lahayn waxbarashada suxufinimada ama tababar ayay dhici kartaa in uu qayb ka jaro hadalkaaga ama haddii kale hadalkaaga iyo sheekadaada dhanka kale u roggo, oo ay dhici karto in uu leeyahay dad badan oo dhageysta internet-ka. Xataa hay'adaha wararka oo kale oo ay dhici karto in aadan taageerin/oggolayn ayaa sheekadooda gaarka ah ka soo goosan kara hadalkaagii rasmiga ahaa.
- La soco in iswaafaq la'aanta ugu yar ee hadalkaagu uu dhaawaci karo dembiilaha mustaqbalka ama kiiska sharciga madaniga ah.
- Qoondee barta xiriirka oo loogu talagalay sii dabagalka weydiimaha/wareysiyada.
- Xusuusnow: Qof dhibaato ka soo gaartay dembi ahaan, lagaagama baahna in aad bixiso wareysiyo ama la hadasho warbaahinta. Faham in aad xaq u leedahay in aad raadsato asturnaan haddii aad rabtid.
- Haddii aad dareento in ay ku dhibaateeyeen weriyayaashu, waxaad cabasho ka gudbin kartaa cidda ay u shaqeeyaan ama booliska.